



HESHIISKII KISMAAYO

31 March 2016

WARMURTIYEEDKII SHIRKA

Intii u dhaxeysay 28-31 March 2016 waxaa magaalada kismaayo ee Xarunta KMG ee Dowlad goboleedka soomaaliyeed ee Juba Land ka dhacay shirweyne heer qaran ah oo dhaliyarada soomaaliyeed uga tashanayeen Midnimadda, door siyaasadeedka,kaalinta hogaamineed iyo Mustaqbalka dhalinyarada soomaliyeed.

Shirka waxaa ka soo qeyb galay 100 dhalinyaro ah oo heer degmo, heer maamul goboleed iyo heer qaranba isugu jira kuwaa oo ka kala socday Ururka Dhalinyarada Qranka soomaliyeed, Ururada dhalinyarada JUBALAND, PUNTLAND, KOOFUR GALBEED, GALMUDG, Goboladda Waqooyi Galbeed, HIIRAAN & SHABEELADA DHEXE iyo Gobalka BANADIR iyadoo si qota dheer dhalinyaradu uga dooday ajendihii shirka si wanaagsana mid mid loo dul istaagay.

Si dhallinyarada Soomaaliyeed loo mideeyo isla markaana loo helo door dhab ah oo dhalinyaradu ku yeelato hab-sami socodka siyaasadeed ee soomaliya, Waxuu shirku soo saaray bayaan ku saabsan sidii dhalinyaradu u heli laheyd midnimadooda loogana qeyb gelin lahaa siyaasadda dalka.

1. Shirku wuxuu bogaadinayaa Ururka Dhalinyarada JUBALAND oo isagu gogosha fidiyay is la markaana casuumay soona dhoweeyay dhalinyaradii ka timid goboladda kale ee dalka.
2. Shirku wuxuu isla gartay in midnimada dhalinyarada soomaaliyeed ay tahay muqadas isla markaana loo baahanyahay in la mideeyo awooda dhalinyarada Soomaaliyeed si loo gaaro danaha dhalinyaradu higsaneyso.
3. Shirku wuxuu isla gartay in shirkii 18-19 lagu qabtay Mogadishu uusan ka turjumeyn rabitaanka dhalinyarada Soomaaliyeed isla markaana ilaa iyo hadda aan waxba ka dhaqan gelin qodobadii ka soo baxay shirkaa ee Wasaaradda dhalinyarada iyo ciyaaruhu sheegtay in ay meel marineyso.
4. Shirku wuxuu is ku raacay in aan guud ahaan dhalinyarada Soomaaliyeed lagala tashan diyaarinta siyaasadda dhalinyarada qaranka Soomaaliyeed iyadoo la ogyahay